

Xannaanada carruurta ee furan

Xannaanada carruurta ee furan waa goob kulan, oo ay ku kulmaan qoysaska leh carruur da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 6 sano, oo ah wakhtiyada maalinta. Uma baahnid inaad boos codsato si aad uga qayb-qaadato. Xannaanada carruurta ee furan wuxuu ilmahaagu ka helayaa waayo-aragnimo ku wajahan la macaamilka bulshada iyo ciyaarta, ka hor inta aanu bilaabin xannaanada carruurta ee caadiga ah.

Bergen waxay leedahay 15 xannaano carruureed oo furan oo gaar loo leeyahay , waxayna ku yaalaan xaafadaha badankood.

Maxaa ka jira xannaanada carruurta ee furan?

- Xannaanada carruurta ee furan waa meherad barbaarin-waxbarasheed, oo ay hoggaamiso bare/macalimad leh aqoonta xannaanada carruurta.
- Waxaad imaan kartaan marka aad rabtaan, saacadaha xannaanadu ay furan tahay.
- Xannaanada furan waa bilaash. Xannaanooyinka furan qaarkood, waxaad bixinaysaa waxooga lacag ah oo ku wajahan wax-qabashooyinka, cuntada iyo agabka (shan karoon iyo wax ka koreeya).
- Adiga ayaa ka mas' uul ah ilmahaaga inta u ku jiro ciyaarta iyo hawlaha wax-qabasho, waxaanad gacan ka gaysanaysaa rafacidda iyo habaysnaanta goobta.
- Hawlaha la qabto waxa tusaale ka ah: Isu imaadka, hees iyo muusig, suugaan iyo sheeko-xariir, wax-qabadyada farshaanka iyo qaabeynta, dhaqdhaqaaq jireed iyo socod loo baxo, cunto sameyn iyo xilliyo cunto la cuno.
- Ilmahaagu wuxuu la ciyaari karaa carruurta kale, waxaanu kobcinaya aqoonta afka, aqoonta ka dhaq-dhaqaaqinta xubnaha culus ee jirka iyo aqoonta xirriirka bulshada.
- Waxaad baraneysaa qoysas kale.
- Waxaad heli kartaa warbixin, talo iyo hagid ku sahabsan dareen-wanaaga iyo horumarka ilmaha, sidoo kale warbixino la xirriira xannaanooyinka carruurta iyo sida loo codsado boos xannano-carruur iyo deeqaha kale ee adeeg ee ku wajahan qoysaska carruurta yar yar leh..



**BERGEN
KOMMUNE**